


# Adeegga caafimaadka qaran waxaa loogu talagalay dhammaan muwaadiniinta ku nool Denmark



Haddii aad tahay muwaadin Denmark reer ah, waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad. Mas'uuliyiinta reer Denmark waxay il gaar ah ku hayaan hubinta in ay jiraan sariiro caafimaad oo ku filan bukaannada qaba COVID-19 ee u baahan daryeel caafimaad.

Haddii aad isku aragto astaamaha COVID-19, tusaale ahaan qufac iyo/ama qandho, waa inaad wacdaa dhakhtarkaaga. Ha booqan dhakhtarkaaga ama ha imaan qolka xaaladaha degdega haddii aad leedahay astaamaha COVID-19.